# FAAFINTA RASMI AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho, 24 Jannaayo 1981, L. 2 R. 1

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S.

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100 Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoriitaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta


# KOOBNIIN


QAYBTA KOWAAD

SHARCI L. 5 ee 17 Dis. 1980, Dhismaha Wakaaladda Harumarinta iyo Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha. . . . . Bogga 74

SHARCI L. 6 ee 17 Dis. 1980, U rogid Sharci Lamb. 27 ee 23 Oktoober 1980, kuna saabsan kordhinta musharka Shaqaalaha Joogtada ah ee Dawladda . . . » 82

SHARCI L. 7 ee 31 Dis. 1980, Wax ka beddelid Sharciga Baasaboorada Sharci Lamb. 21 ee 7.4.1970. . . . . . . . » 81

SHARCI L. 8 ee 31 Dis. 1980, Mashruuca Fidinta iyo Hannaanka Maamulka Beeraha. . . . . . . . . . . . . » 80

QAYBTA LABAAD

W. M.

## QAYBTA KOOWAAD

SHARCI lambar 5 taariikh 17 Diseember 1980 :

Dhismaha Wakaaladda Horumarinta iyo Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### QODOBKA 1AAD

(Dhismaha Wakaaladda)

1. Waxaa la dhisay Wakaaladda Horumarinta iyo Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.
2. Ganacsiga iyo Dhoofinta Faleenka iyo Xabkaha waxaa kaliya oo loo xilsaaray Wakaaladdan.
3. Wakaaladdu waxay tahay mid madax bannaan oo leh jiritaan iyo shakhsiyad qaanuun.
4. Wakaaladdu waxay ku dhaqmi doontaa Sharcigan iyo sharciyada kale ee soo socda:

    b) Sharciga lambar 16 soona baxay 1dii Abriil 1970, kuna saabsan Wakaaladda madax bannaan iyo beddelaaddii ka dambaysay;

    t ) Sharciga lambar 36 soona baxay 22kii Abriil 1972 oo ku saabsanaa Shaqaalaha Wakaaladda madax bannaan;

    j ) Sharciga lambar 58 soona baxay 31dii Luulyo 1972 oo ku saabsanaa lacagta Wakaaladda madax bannaan.

5. Wakaaladda waxaa lagu meeleeyey darajada «B».

### QODOBKA 2AAD

(Xaruunta iyo laamaha Wakaaladda)

Xaruunta Wakaaladdu waxay ahaaneysaa magaalo madaxda Muqdisho, waxayna ku yeelan kartaa laamo

Gobollada iyo Degmooyinka Jamhuuriyadda haddii loo baahdo.

QODOBKA 3AAD

(Ujeedooyinka Wakaaladda)

b) Waxay toos uga gadaneys aaFaleenka iyo Xabkaha dadka tabca.

t ) Waxay sifeyneysaa, fannideysaa toosna u iibgeyneysaa Faleenka iyo Xabkaha dalka.

j ) Waxay xil iska saareysaa inay la socoto wararka ganacsiga ee suuqyada Adduunka. ee lagu kala gato faleenka iyo xabkaha, waxayna ku dadaaleysaa inay ku iib geliso sida ugu habboon oo lagu heli karo sicirka ugu sarreeya.

x) Waxay daryeeleysaa, dhirri gelineysaa iskaashatooyinka iyo dadka tacba Faleenka iyo Xabkaha, si ay u kardhiyaan wax soo saarkooda.

kh) Waxay qayb ka qaadaneysaa horumarinta tacabka Faleenka iyo Xabkaha, iyadoo la kaashaneysa Hay'adaha Dawladda ee u xil saaran kordhinta tacabka iyo daryeelidda dhirta.

QODOBKA 4AAD

(Kormeeridda iyo Ilaalinta Guud)

Wakaaladdu waxay hoos imaaneysaa Wasaaradda Ganacsiga.

QODOBKA 5AAD

(Maareeyaha Guud)

Wakaaladda waxaa madax u noqonaaya Maareeya-Guud, waxaana lagu magacaabayaa Dekreeto uu soo saaro Madaxweynaha JDS, isagoo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga.

## QODOBKA 6AAD

(Maareeyeyaal)

1. Wakaaladdu waxay yeelaneysaa Waaxyo, Qaybo iyo Laamo.

2. Waaxyaha Wakaaladda waxaa madax u noqonaya Maareeyeyaal, waxaana lagu magacaabayaa Dekreeto uu soo saaro Madaxwenaha JDS, isagoo tixgelinaya talada Wasaarka Wasaaradda Ganacsiga iyo tan Maareeyaha Guud ee Wakaaladda.

3. Qaabka Wakaaladda oo tifatiran waxaa lagu soo saari doonaa Xeer Madaxweyne, iyada oo la tixgelinayo talada Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

## QODOBKA 7AAD

(Hawsha Maareeyaha Guud)

1. Maareeyaha Guud, waxaa loo xil saaray, isagoo ka wakiil ah Wakaaladda Fulinta ujeeddooyinka loo dhisay Wakaaladda, hawshiisuna waxay tahay:

   b) wuxuu u xil saaran yahay fulinta hawsha Wakaaladda;

   t) wuxuu mas'uul ka yahay habka maamulka shaqada Wakaaladda, isagoo awood u leh inuu qaado tillaabo kasta oo ku habboon socodsiinta hawsha Wakaaladda;

   j) in uu saxiixo heshiisyada ay Wakaaladdu dhinac ka tahay;

   x) wuxuu mas'uul ka noqonayaa lacagta Wakaaladda;

kh) wixii go'aanno ah ooku saabsan Siyaasadda guud ee Wakaaladda, waa inuu oggolaansho ka haystaa Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga.

2. Marka uu Mareeyaha Guud ka maqnaado shaqadiisa sabab kasta ha ahaatee waxaa meeshiisa loo dhiibayaa Maareeyaha ka tirsan Wakaaladda oo uu Wasiirku ku-sime ahaan u magacaabo.

## QODOBKA 8AAD

### (Raasumaalka Wakaaladda)

Hantida Wakaaladdu waxay ka koobnaan doontaa:

1. Lacagta iyo qiimoha qalabka iyo guryaha ay hadda ku dhaqanto Waaxda Faleenka ee Wakaaladda Ganacsiga Ummadda.

2. Wixii lacag ah ee ka soo gala hawsha ay qabato Wakaaladdu.

3. Wixii hanti ah ee ay Dawladdu ugu deeqdo.

## QODOBKA 9AAD

### (Miisaaniyadda Wakaaladda)

1. Maareeyaha Guud, marka ay tahay 30ka Oktoobar ama inta ka horreysa sannad kasta waa inuu isku dubba ridaa Miisaaniyadda sannadka soo socda maaliyadda soo galeysa isaga oo ku faafaahinaya kuna muujinaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Wakaaladda sannadka soo socda, wuxuuna hordhigi doonaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga si loo oggolaado.

2. Miisaaniyadda lacagta sannadka ee Wakaaladda waa inay ahaataa mid la socota oo tixgeli-

## QODOBKA 10AAD

(Xiritaanka Xisaabaadka)

1. Maareeyaha Guud, marka ay tahay 31ka Maarso ama inta ka horreysa sannad kasta, waa inuu isku dubba ridaa xiritaanka xisaabaadka Wakaaladda ee sannadka la soo dhaafay, isagoo isku hagaajinaya dakhliga, macaashka iyo khasaaraha Wakaaladda, waxaana uu u gudbinayaa Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasaaradda Ganacsiga.

2. Wasiirka Wasaaradda Ganacsigu wuxuu awood u leeyahy, isagoo la tashanaya Waaasrka Wasaaradda Maaliyadda, inuu oggolaado xiritaanka xisaabaadka, wuxuuna amar ku bixin karaa in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, iyadoo kharajka ay bixineyso Wakaaladdu.

## QODOBKA 11AAD

( A m a a h )

Wakaaladdu,iyadoo haysata oggolaanshaha Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga oo la tashaday Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, waxay lacag ka amaahan kartaa Bankiyada iyo Hay'adaha dalka iyo dibadda si ay u fuliso hawsha loo xil saaray.

## QODOBKA 12AAD

( Xeerka Guud )

Madaxweynaha JDS, wuxuu awood u leeyahay, isagoo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga, inuu soo saaro Xeer Nidaamiye tifaftiraya hawsha loo xil saaray Wakaaladda, gaar ahaan nidaamka ganacsiga gudaha ee Faleenka iyo Xabkaha.

## QODOBKA 13AAD

(Xaddidaadda Sicirka Gudaha iyo Dibedda)

Sicirka gudaha ee ay Wakaaladdu wax ku gadanayso iyo kan lagu dhoofiyo, waxaa lagu xaddidi doonaa marba Xeer uu soo saari doono Wasiirka Wasaaradda

Ganacsiga, isagoo tixgelinaya sicirka Adduunka iyo daryeelidda kobcinta tacabka.

QODOBKA 14AAD

(Tirtirid Sharci)

Waxaa la burriyey Sharciga lamb. 17 soona baxay 4ta Maarso 1972 ee Wakaaladda Ganacsiga Ummadda loogu xilsaaray ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha iyo sharci kasta ee ka hor imanaya ama aan la socon karin sharcigan.

QODOBKA 15AAD

(Dhaqan galka Sharcigan)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, isagoo ka mid noqon doona Sharciyada Dalka.

Muqdisho, 17 Dis. 1980

MADAXWEYNAHA JDS
( S/Gaas Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI lambar 7 taariikh ee 2-
Wax ka beddelid Sharci-
lambar 21 ee 7.4.197-

ISAGO-

Sharcig...
saxiixo Mad...
Faafinta Ras...
Muqdisho,

( S/Gaas



5. Tababaridda iyo kor u qaadidda waaya aragnimada Shaqaalaha, fidinta iyo Hannanka Maamulka Beeraha Dalka.

6. Fulinta waxyaabaha ay qorayaan Heshiisyada dhexmaray Dawladaha iyo Hay'adaha caalamiga ah oo ay ka mid yihiin IDA, USAID.

QODOBKA 3AAD

(Xaruunta Mashruuca)

Xarunta Mashruuca waxay ahaan doontaa Afgooye oo ku taalla G/Sh/Hoose.

QODOBKA 4AAD

(A w o o d d a)

Mashruucu wuxuu leeyahay awood uu ku fulin karo ujeeddooyinka ku xusan qodobka labaad ee Sharcigan.

QODOBKA 5AAD

(Xubnaha Mashruuca)

Xubnaha Mashruucu waxay ka kooban yihiin:-

1. Guddiga Maamulka Mashruuca;
2. Xarunta Tababarka, Fidinta iyo Hannaanka Maamulka Beeraha;
3. Guddiga Xiriirka Farsamada;
4. Waaxyo iyo xubno kala duwan oo lagu fuli... ujeeddooyinka Sharcigan ku tilmaaman.

...uxuu kaloo yeelanayaa xubin ma...
...abi doono Xubinta Qorsh...
...oo qaban doona h...
...ruuca iy...

1. Maareeyaha Guud ee Mashruuca;
2. Maareeyaha Farsamada;
3. Maareeyaha Kontoroolka Lacagta.

## QODOBKA 7AAD

(Guddiga Xiriirka Farsamada)

1. Guddiga Xiriirka Farsamada ee Mashruuca wuxuu ka kooban yahay:-

1. Guddiga Xiriirka Farsamada ee Mashruuca wuxuu ka kooban yahay:-

a) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Beeraha Guddoomiye;

b) Maareeyaha Guud ee Mashruuca Xubin;

t ) Agaasimaha Waaxda Amaahda Beeraha ee Bankiga Horumarinta Xubin;

j ) Agaasimaha Waaxda Farsamada ONAT «

x) Agaasimaha Waaxda Suuq-gelinta Badarka ADC Xubin

kh) Agaasimaha Machadka Tijaabada Xubin.

2. Hawlaha Guddiga Xiriirka Farsamada ee Mashruuca:-

a) Guddigu wuxuu isku dubbaridayaa talana ka bixinayaa siyaasadda Guud ee taakulenta beeraleyda, wuxuu had iyo jeer talooyin ka bixin doonaa si faalaha lagu maamulayo iyo hawlaha la xiriira gaarsiinta beeraleyda qalabka beeraha iwm.

b) Guddigu wuxuu shir isgu iman doonaa sannadkii ugu yaraan laba jeer.

c) Guddigu wuxuu leeyahay awood kormeer joogto ah ama mid kedis ah oo uu ku sameyn karo hubitaanka gaarsiinta waxyaalaha ay beeraleydu u baahanyihiin ee ay ka mid yihiin qalabka beeraha, bacrinta iyo sunta.

## QODOBKA 8AAD

(Dhismaha Guddiga Maamulka iyo Magacaabiddooda)

1. Maareeyaha Guud, Maareeyaha Farsamada iyo Maareeyaha Kontoroolka Lacagta waa Taliska u sarreeya Mashruuca, kaasoo u qorsheynaya, u toosinaya, fulinayana, isla markaasna daba gelaya hawlaha Mashruuca. Wuxuu leeyahay awood madaxbannan ee dhinaca maamukla, maaliyadda, farsamada iyo qorsheynta ku saabsan dhaqdhaqaaq kasta uu Mashruucu ku kacayo. Wuxuuna ka kooban yahay saddex xubnood oo kala ah: Maareeyaha Guud, Maareeyaha Farsamada iyo Maareeyaha Kontoroolka Lacagta.

2. Maareeyaha Guud waxaa magacaabaya Dawladda Soomaaliya, Maareeyaha Farsamada iyo Maareeyaha Kontoroolka Lacagta waxaa si wadajir ah u magacaabaya Bankiga Adduunka iyo Dawladda Soomaaliya.

3. Maareeyaha Guud ayaa ka mas'uul ah Mashruuca sharci ahaan, wuxuuna leeyahay awood uu ku saxiixo lacagta, waxaana lammaane ula saxiixaya Maareeyaha Kontoroolka Lacagta iyo Xubnaha kale uu sharcigu tilmaamayo.

## QODOBKA 9AAD

## (Maareeyaha Guud)

1. Wuxuu ka mas'uul yahay isagoo la tashanaya Maareeyaha Farsamada siyaasadda guud ee Mashruuca, qorsheynta guud, horumarinta dhismaha, hawlaha Mashruuca, kormeerka iyo fulitaankooda.

2. Wuxuu kala qeyb qaadanayaa Maareeyaha Farsamada Mashruuca iyo Guddiga Shaqaalahaee Mashruuca xulka iyo doorashada dadka tababarka dibadda loogu dirayo.

3. Wuxuu talo ka soo jeedinayaa qoridda khubarada shisheeyaha ah.

4. Wuxuu xiriirinayaa hay'adaha kala duwan ee maalgelisay Mashruuca, wuxuuna hubinayaa in si habsami ah loo fuliyo hawlaha qaybaha kala duwan.

5. Wuxuu hubinayaa xiriirka dhammaan Wasaaradaha, hay'adaha Dawladda iyo cilmiga qeybaha tijaabada ee dalka.

6. Wuxuu maamulayaa, hubinayaa xisaabaadka Mashruuca, habka wax gadashada alaabta iyo shaqooyinka Mashruucu u baahdo.

7. Wuxuu ka mas'uul yahay fulinta go'aannada Guddiga Maamulka iyo kan xiriirka farsamada.

QODOBKA 10AAD

(Maareeyaha Farsamada Mashruuca)

Wuxuu ka caawinayaa Maareeyaha Guud dhinaca kormeerka, fulinta hawlaha dhismaha iyo qorshaha tababaridda ku xusan Mashruuca si waafaqsan nidaamka guud ee Mashruuca, wuxuuna si gaar ah uga kaalmeynayaa:

1. U darbinta shaqaalaha Soomaaliyeed maamulka iyo fulinta heerarka kala duwan ee shaqoo yinka Mashruuca.

2. Hubinta qorshaha tababarrada iyo xulka dadka loo doorto tababarrada goobaha shaqada iyo kuwa gudaha iyo dibadda.

3. U fidinta taakulo, farsamo iyo maamulka habboon ee sugaaya in waqti habboon lagu fuliyo dhammaan hawlaha Mashruuca.

4. Sugitaanka qorshaha iyo fulinta dhismaha guryaha iwm ee la xiriira Mashruuca.

5. Kaalmeynta hubitaanka xisaab celinta lacagta Mashruuca iyo iibsiga alaabta iyo hawlaha kale ee Mashruuca u baahdo.

6. Ka kaalmeynta Maareeyaha Guud dhinaca maamulka iyo maareynta barnaamijka tababarka dibadda.
7. Hubintaanka nidaamka khubarada shisheeyaha.
8. Kormeerka yio hubinta fulinta hawlaha Mashruuca.

## QODOBKA 11AAD

(Maareeyaha Kontoroolka Lacagta)

1. Wuxuu maamuliyaa xisaabaadka lacagta Mashruuca, miisaaniyadda, iibka iyo bixinta kharajka Mashruucu galo.
2. Wuxuu lammaan la saxiixanayaa Jeegagga Maareeyaha Guud ee Mashruuca.
3. Wuxuu hubinayaa dhammaan qoraallada lacagta intaan loo gudbin saxiixa Maareeyaha Guud si uu caddeeyo inay sax yihiin sharcigana waafaqsan yihiin.

## QODOBKA 12AAD

(Magacaabidda Xubnaha Mashruuca)

Maareeyaha Guud iyo madaxda kale ee Mashruuca waxaa lagu magacaabayaa Xeer uu saxiixo Madaxweynaha JDS, isagoo tixgelinaaya ra'yiga Wasiirka Beeraha, iyadoo la raacayo Sharciga Shaqaalaha Dawladda iyo kan hay'adaha madax bannaan ee Dawladda.

## QODOBKA 13AAD

(Xuquuqda Dhaqaalaha)

Xuquuqda Dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud iyo Madaxda kale ee Soomaalida waxaa xukumi doona Sharciga Lam. 36 ee 22kii April 1972 iyo Xeerka Lam. MGSK 74 ee 22kii April 1972.

## QODOBKA 14AAD

(Shaqaalaha)

SHARCI Lambar 8, Taariikh 31 Diseembar 1980 Mashruuca Fidinta iyo Hannaanka Maamulka Beeraha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA : oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QODOBKA 1AAD

(Dhismaha Mashruuca)

1. Mashruuca Fidinta iyo Hannaanka Maamulka Beeraha oo iminka wixii ka dambeeya lagu magacaabi doono «Mashruuca» ayaa halkaan lagu dhisay.
2. Mashruucu wuxuu yahay mid madaxbannaan oo awood iyo jirid qaanuuni ah leh, wuxuuna la mid yahay Wakaaladaha ama Mashaariicda heerkoodu yahay «A».
3. Mashruucu wuxuu hoos yimaadaa Wasaaradda Beeraha.

QODOBKA 2AAD

(Ujeedooyinka Mashruuca)

Ujeedooyinka Mashruuca waxay yihiin:-

1. Horumarinta guud ee tacabka Beeraha Dalka J.D.S.
2. Tababarka aqoon iyo farsamoyaqaannadii maamuli lahaa Sharciyada Beeraha, Iskaashatooyinka, Beeraha waaweyn iyo kuwa yar yar.
3. Ka qayb qaadashao himilada Kacaanka ee dhinaca dalagyada quudka dalka.
4. Fidinta aqoonta Beeraha iyo tababarka Beeraleyda dalka.

5. Tababaridda iyo kor u qaadidda waaya aragnimada Shaqaalaha, fidinta iyo Hannanka Maamulka Beeraha Dalka.

6. Fulinta waxyaabaha ay qorayaan Heshiisyada dhexmaray Dawladaha iyo Hay'adaha caalamiga ah oo ay ka mid yihiin IDA, USAID.

QODOBKA 3AAD

(Xaruunta Mashruuca)

Xarunta Mashruuca waxay ahaan doontaa Afgooye oo ku taalla G/Sh/Hoose.

QODOBKA 4AAD

(A w o o d d a)

Mashruucu wuxuu leeyahay awood uu ku fulin karo ujeeddooyinka ku xusan qodobka labaad ee Sharcigan.

QODOBKA 5AAD

(Xubnaha Mashruuca)

Xubnaha Mashruucu waxay ka kooban yihiin:-

1. Guddiga Maamulka Mashruuca;
2. Xarunta Tababarka, Fidinta iyo Hannaanka Maamulka Beeraha;
3. Guddiga Xiriirka Farsamada;
4. Waaxyo iyo xubno kala duwan oo lagu fuliyo ujeeddooyinka Sharcigan ku tilmaaman.

Mashruucu wuxuu kaloo yeelanayaa xubin madaxbannaan oo lagu magacaabi doono Xubinta Qorsheynta iyo Kormeerka iyo Qiimeynta oo qaban doona hawlaha laxiriira fulinta ujeeddooyinka Mashruuca iyo waxtarkiisaba.

QODOBKA 6AAD

(Guddiga Maamulka)

Guddiga wuxuu ka kooban yahay:-

1. Maareeyaha Guud ee Mashruuca;
2. Maareeyaha Farsamada;
3. Maareeyaha Kontoroolka Lacagta.

QODOBKA 7AAD

(Guddiga Xiriirka Farsamada)

1. Guddiga Xiriirka Farsamada ee Mashruuca wuxuu ka kooban yahay:-

1. Guddiga Xiriirka Farsamada ee Mashruuca wuxuu ka kooban yahay:-

a) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Beeraha Guddoomiye;

b) Maareeyaha Guud ee Mashruuca Xubin;

t ) Agaasimaha Waaxda Amaahda Beeraha ee Bankiga Horumarinta Xubin;

j ) Agaasimaha Waaxda Farsamada ONAT «

x) Agaasimaha Waaxda Suuq-gelinta Badarka ADC Xubin

kh) Agaasimaha Machadka Tijaabada Xubin.

2. Hawlaha Guddiga Xiriirka Farsamada ee Mashruuca:-

a) Guddigu wuxuu isku dubbaridayaa talana ka bixinayaa siyaasadda Guud ee taakulenta beeraleyda, wuxuu had iyo jeer talooyin ka bixin doonaa si faalaha lagu maamulayo iyo hawlaha la xiriira gaarsiinta beeraleyda qalabka beeraha iwm.

b) Guddigu wuxuu shir isgu iman doonaa sannadkii ugu yaraan laba jeer.

c) Guddigu wuxuu leeyahay awood kormeer joogto ah ama mid kedis ah oo uu ku sameyn karo hubitaanka gaarsiinta waxyaalaha ay beeraleydu u baahanyihiin ee ay ka mid yihiin qalabka beeraha, bacrinta iyo sunta.

QODOBKA 8AAD

(Dhismaha Guddiga Maamulka iyo Magacaabiddooda)

1. Maareeyaha Guud, Maareeyaha Farsamada iyo Maareeyaha Kontoroolka Lacagta waa Taliska u sarreeya Mashruuca, kaasoo u qorsheynaya, u toosinaya, fulinayana, isla markaasna daba gelaya hawlaha Mashruuca. Wuxuu leeyahay awood madaxbannan ee dhinaca maamukla, maaliyadda, farsamada iyo qorsheynta ku saabsan dhaqdhaqaaq kasta uu Mashruucu ku kacayo. Wuxuuna ka kooban yahay saddex xubnood oo kala ah: Maareeyaha Guud, Maareeyaha Farsamada iyo Maareeyaha Kontoroolka Lacagta.

2. Maareeyaha Guud waxaa magacaabaya Dawladda Soomaaliya, Maareeyaha Farsamada iyo Maareeyaha Kontoroolka Lacagta waxaa si wadajir ah u magacaabaya Bankiga Adduunka iyo Dawladda Soomaaliya.

3. Maareeyaha Guud ayaa ka mas'uul ah Mashruuca sharci ahaan, wuxuuna leeyahay awood uu ku saxiixo lacagta, waxaana lammaane ula saxiixaya Maareeyaha Kontoroolka Lacagta iyo Xubnaha kale uu sharcigu tilmaamayo.

## QODOBKA 9AAD

### (Maareeyaha Guud)

1. Wuxuu ka mas'uul yahay isagoo la tashanaya Maareeyaha Farsamada siyaasadda guud ee Mashruuca, qorsheynta guud, horumarinta dhismaha, hawlaha Mashruuca, kormeerka iyo fulitaankooda.

2. Wuxuu kala qeyb qaadanayaa Maareeyaha Farsamada Mashruuca iyo Guddiga Shaqaalahaee Mashruuca xulka iyo doorashada dadka tababarka dibadda loogu dirayo.

3. Wuxuu talo ka soo jeedinayaa qoridda khubarada shisheeyaha ah.

4. Wuxuu xiriirinayaa hay'adaha kala duwan ee maalgelisay Mashruuca, wuxuuna hubinayaa in si habsami ah loo fuliyo hawlaha qaybaha kala duwan.

5. Wuxuu hubinayaa xiriirka dhammaan Wasaaradaha, hay'adaha Dawladda iyo cilmiga qeybaha tijaabada ee dalka.

6. Wuxuu maamulayaa, hubinayaa xisaabaadka Mashruuca, habka wax gadashada alaabta iyo shaqooyinka Mashruucu u baahdo.

7. Wuxuu ka mas'uul yahay fulinta go'aannada Guddiga Maamulka iyo kan xiriirka farsamada.

QODOBKA 10AAD

(Maareeyaha Farsamada Mashruuca)

Wuxuu ka caawinayaa Maareeyaha Guud dhinaca kormeerka, fulinta hawlaha dhismaha iyo qorshaha tababaridda ku xusan Mashruuca si waafaqsan nidaamka guud ee Mashruuca, wuxuuna si gaar ah uga kaalmeynayaa·

1. U darbinta shaqaalaha Soomaaliyeed maamulka iyo fulinta heerarka kala duwan ee shaqooyinka Mashruuca.

2. Hubinta qorshaha tababarrada iyo xulka dadka loo doorto tababarrada goobaha shaqada iyo kuwa gudaha iyo dibadda.

3. U fidinta taakulo, farsamo iyo maamulka habboon ee sugaaya in waqti habboon lagu fuliyo dhammaan hawlaha Mashruuca.

4. Sugitaanka qorshaha iyo fulinta dhismaha guryaha iwm ee la xiriira Mashruuca.

5. Kaalmeynta hubitaanka xisaab ce'inta lacagta Mashruuca iyo iibsiga alaabta iyo hawlaha kale ee Mashruuca u baahdo.

6. Ka kaalmeynta Maareeyaha Guud dhinaca maamulka iyo maareynta barnaamijka tababarka dibadda.
7. Hubintaanka nidaamka khubarada shisheeyaha.
8. Kormeerka yio hubinta fulinta hawlaha Mashruuca.

QODOBKA 11AAD

(Maareeyaha Kontoroolka Lacagta)

1. Wuxuu maamuliyaa xisaabaadka lacagta Mashruuca, miisaaniyadda, iibka iyo bixinta kharajka Mashruucu galo.
2. Wuxuu lammaan la saxiixanayaa Jeegagga Maareeyaha Guud ee Mashruuca.
3. Wuxuu hubinayaa dhammaan qoraallada lacagta intaan loo gudbin saxiixa Maareeyaha Guud si uu caddeeyo inay sax yihiin sharcigana waafaqsan yihiin.

QODOBKA 12AAD

(Magacaabidda Xubnaha Mashruuca)

Maareeyaha Guud iyo madaxda kale ee Mashruuca waxaa lagu magacaabayaa Xeer uu saxiixo Madaxweynaha JDS, isagoo tixgelinaaya ra'yiga Wasiirka Beeraha, iyadoo la raacayo Sharciga Shaqaalaha Dawladda iyo kan hay'adaha madax bannaan ee Dawladda.

QODOBKA 13AAD

(Xuquuqda Dhaqaalaha)

Xuquuqda Dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud iyo Madaxda kale ee Soomaalida waxaa xukumi doona Sharciga Lam. 36 ee 22kii April 1972 iyo Xeerka Lam. MGSK 74 ee 22kii April 1972.

QODOBKA 14AAD

(S h a q a a l a h a)

1. Mashruucu wuxuu qoran karaa Shaqaalaha uu u baahan yahay iyadoo la raacayo sharciyada shaqo qoridda, isla markaasna Mashruuca wuxuu awood u leeyahay inuu qorto Khubarada Ajnabiga ah ee u baahan yahay, isagoo raacaya sharciyada dalka, sitana oggolaanshaha Wasiirka Beeraha iyo Bankiga Adduunka.
2. Shuruudaha shaqada ee Shaqaalaha Mashruuca waxaa xukuma sharcigan iyo qawaaniinta faahfaahsan (Regulation) ee shacigan la xiriira iyo Sharciyada ku xusan Qod. 13aad ee Sharcigan.

QODOBKA 15AAD

(Raasamaalka mashruuca)

Raasamaalka Mashruuca wuxuu ka kooban yahay:-

1. Lacagta dakhliga ee ka imaanaysa IDA, ADF, USAID, iyo Dawladda JDS, oo guud ahaan isku dhan 32.44 Malyuun oo Doolarka Mareykanka ah ama Sh. So. 204 Malyuun.
2. Wixii lacag ah oo ka soo gala hawlaha Mashruucu qabto.
3. Wixii hanti ah ee Dawladda iyo Ururrada caalamiga ahi ugu deeqaan Mashruuca.
4. Wixii lacag keyd ah «Reserve fund» ee sannad kasta u dhigma Mashruuca.

QODOBKA 16AAD

(Miisaaniyadda Mashruuca)

Maareeyaha Guud marka ay tahay «30ka» Setembar ama inta ka horreysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa Miisaaniyadda sannadka Maaliyadda soo galay, isagoo faahfaahinaya kuna muujinaya bandhigga Miisaaniyadda lacagta soo geli doonta iyo tan ka bixi doonta.

QODOBKA 17AAD

(Xisaabaadka Sannadka)

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 31ka Maarso ama inta ka horreysa sannad kasta waa inuu diyaariyo, iskunasoo dubbaridaa xisaabaadka sannadka iyo bandhiggii kharashka Mashruuca ee sannadkii Maaliyaddii hore, isla markaasna u gudbiyo Guddiga Sare ee Mashkadib marka uu la tashado Guddiga Fulinta.

2. Guddiga Maamulka Mashruuca wuxuu awood u leeyahay inuu oggolaado ama wax ka beddelo xisaabaadka sannadka, wuxuuna amar ku bixin karaa in lagu qoro faahfaahinta rasmiga ah ee Dawladda, iyadoo kharashka uu bixinaayo «Mashruuca».

QODOBKA 18AAD

(A m a a h)

Mashruuca isagoo haysta guddoonka maamulka Mashruuca iyo oggolaanshaha Wasiirka Wasaaradda Beeraha wuxuu awood u leeyahay inuu ka amaahdo Xaruumaha lacagta (Financial institions) ee dalka iyo dibeddaba, si uu u hirgeliyo xilka lasaaray ama ujeedooyinka «Mashruuca», iyadoo la tixgelinaayo raasamaalka Mashruuca oo la filaayo in lagu bixiyo amaahdaas, taasoo maamulkeeda lagu soo habayn doono Xeer Madaxweyne.

QODOBKA 19AAD

(Baadhidda Xisaabaadka)

Xisaabaadka Mashruuca waxaa baadhi doona Hantidhowraha Guud.

QODOBKA 20AAD

(Maamulka Lacagta)

Maamulka lacagta ee Mashruuca waxaa xukuma laguna maamulayaa habka ay tilmaamayaan Sharciyada Dawladda iyo qawaaniinta faahfaahsan ee la xiriira.

QODOBKA 21AAD

(Guddoomiyaha Qawaaniinta Faahfaahsan)

Madaxweynaha JDS wuxuu awood u leeyahay, isagoo tixgelinaaya talada Wasiirka Beeraha, inuu soo saaro Xeer faahfaahsan oo tilmaamaya habka hirgelin-qodobbada Sharciga.

QODOBKA 22AAD

(Dhaqanka Gelidda)

1. Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Feb.1980.
2. Sharcigani wuxuu ka mid noqonayaa Sharciyada Rasmiga ah iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 31 Dis.1980

MADAXWEYNAHA JDS

( S/Gaas Jaalle Maxamed Siyaad Barre)